

Wargeeska Badqabka Nadiifiyayaasha

Jiilaalka 2025

Ogeysiisyo: Daraasada Mop


Ilaa markii aan biloownay inaan la shaqeyno shaqaalaha nadaafada iyo nadiifiyaasha, cilmi baareyaasheena ayaa xog ka ogaanaayay sida adeegsiga noocyada kala duwan ee qalabka nadiifintu u saamaynayso jirka. Hadda, waxaan diyaarinaynaa daraasad shaybaar si aan u baarno noocyada kala duwan ee tirtiraha.

Daraasadaan ayaa ka dhici doonta Tumwater, WA shaybaarka cilmi baarista ee SHARP. Gudaha shaybaarka, waxaan samayn doonaa shaqooyinka tirtirista ee baaritaannadeena kuwaasoo lamid ah waxa shaqaalaha nadaafada iyo nadiifiyaasha ay ku shaqeyn karaan- sida in ka qaybgaleyaashu xaaqaan aaga waxyaabaha gadhiya ama hoosta miisaska xafiiska. Waxaan ku tijaabin doonaa qalabka dad ka soo kala jeeda asallada kala duwan (labadaba xirfadleyaasha nadaafada ee khibrada leh iyo dadka kale).

Raadi warlaliskeena xiga si aad u ogaato sida aad uga qaybgeli karto! Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan daraasadaan, fadlan la xiriir: Christina.Garbuz@Lni.wa.gov

Iftiiminta Khatarta: Badqabka wax tirtirista

Ilaa Luuliyo 1, 2019, waxaa jiray 182 sheegasho oo ka yimid nadiifiyaasha doorka ka qaata xaaqinnada iyo shaqooyinka xaaqinka. Nadiifiyaasha ayaa badanaa kufa inta ay ku soconayaan sagxadda qoyan. Afarta boqolkiiba (40%) kuwaan ayaa ahaa sheegashooyin la xiriiray badelida mushaarka ama naafada (caadiyan ka dhashay dhaawacyada daran ama xanuunka). Shaxda hoose ayaa muujinaysa noocyada ugu badan ee dhaawaca:



Sadex meelood meel (30%) sheegashooyinka xaaqinka ayaa loo aqoonsaday xanuunka lafaha ee ka dhashay shaqada.

Ka-hortagga ideas:

- Qorshee tubahaaga xaaqinta si aad u ogolaato gelitaanka agabka xaaqinka (iyo meesha looga baxo) adiga oo aan u baahan inaad ku socoto meel qoyan. Xiro kabo leh shaag wanaagsan.
- Iskuday inaad dhabarkaaga toosiso sida ugu badan ee suuragalka ah. Iska ilaali inaad wakhti aad u badan geliso dhabarkaaga oo qolaacan (aad ku foorarsato xaaqinka). Isku soo dhawee xaaqinkaaga.
- Si badqab leh u adeegso kiimikooyinka – baro noocyada kiimikooyinka la adeegsanaayo, iyo saamaynada jireed ee ay sababi karaan. Xiro gacmo gashiyada iyo difaaca indhaha haddii aad isku qasayso maadooyin ama marka aad buuxinayso iyo marka aad daadinayso biyaha baaldiga dhaqaalka, waayo kuwaan ayaa ku faniini kara indhahaaga ama maqaarkaaga. Haddii ay suuragal tahay, xaqiiji inaad furto daaqadaha aadna hesho hawo kugu filan.
- Haddii aad awoodo, isku badel shaqada oo qaado bareegyo.

ⁱ Xeeraynta xaq-sheegashada ee sifooyinka dhaawaca ee loogu talagalay magdhowga dhaawacyada shaqaalaha ayaa u kala duwan Sanduuqa Gobolka/(SF) iyo Is-Cayminta/Self-Insured (SI), falanqeyntan ayaa loo adeegsadaa labada nidaam waxaanna loo koaxeeyaa koodhahka isku midka ah. Sagaal iyo toban boqolkiiba (19%) ee xaq-sheegashooyinkan ma lahan macluumaad ku filan oo lagu kala sooco.